

Dhimista qiimaha ay waalidiinta ku bixiyaan xanaanada/SFO-ga laga bilaabo juun 2021

XANAANADDA

Dhimista qiimaha ay bixinayaan guryaha uu dakhligooda ka hooseeyo 592 167 kroner sanadkii

Dadka wada deggan guri uu dakhligiisa sanadlaha ah, ee wadareed ka hooseeyo 592 167 kroner sanadkii, waxey codsan karaan in laga dhimo kharash-ka waalidiintu ay ku bixiyaan xanaanada-caruurta. Xusuuso inaad canug walba goonidiis ugu codsato haddii aad leedahay dhowr canug.

Waxaa intaas dheer in wakhtiga saacadaha dhexe (kjernetid) bilaash u yahay guryaha uu dakhligooda ka hooseeyo 583 650 kroner sanadkii

Wakhtiga saacadaha dhexe ee bilaash-ka ah, waxaa laga wadaa in canuga uu xanaanada joogayo 20 saacadood oo bilaash ah toddobaadkii. Wakhtiga saacadaha dhexe ee bilaash-ka ah, waxaad adigu heleysaa laga bilaabo bisha ogoosto sanadka uu canugaagu buuxinayo labo sano. Haddii aad soo codsato in lagaa dhimo qiimaha waalidku bixiyo, waxaad si otomaatik ah, u heleysaa wakhtiga saacadaha dhexe ee bilaash-ka, haddii dakhliga gurigaagu uu ka hooseeyo 583 650 kroner sanadkii.

SFO

Dhimista qiimaha ay bixinayaan guryaha uu dakhligooda ka hooseeyo 505 083 kroner sanadkii

Dadka wada deggan guri uu dakhligiisa wadareed ee sanadkii, uu ka hooseeyo 505 083 kroner sanadkii, waxey soo codsan karaan in laga dhimo kharashka waalidiintu ay ku bixiyaan SFO-ga.

SFO bilaash ah oo kuwajahan fasalka koowaad, waxaa helaya guryaha dakhligooda uu ka hooseeyo 350 000 kroner sanadkii.

Haddii aad soo codsato in lagaa dhimo kharashka SFO-ga, waxaad si otomaatik ah u helaysaa SFO bilaash ah, haddii canugaagu dhigto fasalka 1-aad, dakhliga gurigu-na uu ka hooseeyo 350 000 kroner sanadkii.

Sidan ayaad u codsanaysaa

Qaab elektaroonig ah ayaad ku soo codsanaysaa. Ku soo lifaaq dukumiintiyo shaqeynaya, oo aan dhacsaneyn. Waxaad ka galaysaa ID porten (Bank ID, Min ID, iwm.) si aad u soo codsato.

Foomka codsiga halkan ayaad ka heleysaa:

www.bergen.kommune.no/redusert-foreldrebetaling

Maxaa dukumiinti/ caddeyn sax ah noqon kara:

- Warqadaha ogeysiiska-cashuurta 2020 (skattemelding) ee dadka waaweyn/dadka qaangaarka ah, ee guri la deggan canugga, waa in la soo raaciyo codsiga
- Haddii uu jiro Isbeddel weyn oo la xirriira dakhliga, marka loo fiiriyo warbixinta warqadda ogeysiiska-cashuurta, waxaad markaas soo raacin kartaa codsiga, warqadaha mushaharka ee seddexdii bilood ee ugu dambeeyey
- Haddii shaqada si ku meel gaar ah lagaaga fariisiiyey (permittert), waxaad soo raacin kartaa codsiga, caddeyn aad ka soo qaadey shaqo-bixiyahaaga.
- Go'aanka lagugu soo oggolaadey in taageero lagaa siiyo xafiiska deynta-waxbarashada (lånekassen) iyo aqoonsiga ardayga (studentbevis)
- Go'aanka laguugu soo oggolaadey in taageero lagaa siiyo xafiiska NAV sosial/ama in go'aankii taageerada NAV-sosial uu kaa istaagey/ kaa joogsadey
- Haddii aad NAV ka sugeyso war/ kala caddeyn xaaladaada la xirriirta, waa in arrintaas dukumiinti ahaan aad ku soo caddeysaa
- Dukumiintiy/caddeymo kale oo la xirriira dakhligaa-ga xilligan/hadda

Ma haysto warqadda ogeysiiska-cashuurta (skattemelding)

Dhammaan dadka sanadkii u dambeeyay Norway deggenaa, waxey heleen warqadda ogeysiiska-cashuurta, waxaane weeye in warqadaas la soo raaciyo codsiga. Haddii aad mar dhow Norway timi oo aadan haysanin warqadda ogeysiiska-cashuurta, waa in aad soo raaciso caddeyn la xirriirta sharciga dal ku jooga Norway.

Codsiga goorma ayaa laga soo billaabayaa

Codsiga dhimista kharakh-ka waalidiintu bixiyaan, waxaa laga soo bilaabaya bisha codsiga la helay, bisha xigta. Go'aan waxaa lagu soo diridoona markii codsiga la soo oggolaado.

Ma lihi lambarka shakhsiga ah (personnummer)/ qaab elektaroonig ah kuma codsan karo:

Waxaad la soo xidhiidhi kartaa degmada Bergen, xafiiska adeegga dadweynaha (innbyggerservice) ee ku yaalla Kaigaten. Halkaas waxaad ka heleysa caawimaad la xirriira in aad ku codsato qaab elektaroonig ah, ama aad ku codsato qaab warqadeed haddii aadan laheyn lambarka shakhsiga ah(personnummer). Hore usoo qaado aqoonsi shaqeynaya iyo dukumiintiyada/caddeymaha la xirriira codsiga. Lambarka xafiiska adeegga dadweynaha waa 55 56 55 56.

FG! Xusuusnow in aad sannad-xannaaned kasta, si gaar ah aad u soo codsato kharash dhimista!

Go'aanka kharash-dhimistu, wuxu shaqeynaya hal sano markiiba. Waa in aad codsi cusub soo dirto ugu dambeyn bisha luuliyoo, si aad u heshid kharash-dhimis bisha ogoosto.